

Waa maxay Kiisaska Talaalku Difaaci waayay?

QORAALKA

[muusik qafiiif ah]

[Warin]

Waxaad dabcan maqashay erayga kiisaska talaalku difaaci waayay, waxaadna la yaaban tahay wuxuu laga wado iyo waxay yihiinn.

Kiisaska talaalku difaaci waayay ayaa dhaca marka dadka qaata talaalka buuxa wali laga helo fayraska COVID-19. Tani waa wax caadi ah. Ma jiro talaal 100% shaqaynaaya.

Markay dad badan istalaalaan, waxaa kordhaaya tirada dadka uusan talaalku difaacin.

Kaba soo qaad koox toban qof ka kooban, sagaal ay qaateen talaalka midna uusan qaadan. Kadibna dhammaan tobanka qofba ay la joogaan qof qaba COVID-19, kadibna labo qof oo kale laga helo talaalka. Mid talaalka qaba iyo mid aan la talaalin.

Inkastoo bar kamid ah caabuqyadu ay yihiin kiisaska talaalku ka hortagi waayay, waxay noqon kartaa mid marin habaabbin abuurta waayo sideeda qof ee kale ee la talaalay lama aysan jiran COVID-19.

Inkastoo kiisaska talaalku difaaci waayo ay soo badan karaan marka faracyada fayrasku kordhaan, dadka talaalka buuxa qaba ayay aad u yar tahay inay xanuun daran ka qaadaan ama isbitaal loo dhigo cudurka, marka talaalladu way shaqaynayaan!

Tani waxay aad muhiim ugu tahay xaqiijinta in isbitaaladu haystaan sariiro ku filan qof kasta iyo in dadka u baahan daryeelka degdega ah ay helaan si dhakhsso ah.

Qaadashada talaalku waa qaabka ugu fiican ood naftaada iyo dadka kula joogaba aad uga difaacdo COVID-19.

Wixii xog dheeraad ah oo ku saabsan COVID-19, booqo webseedka Waaxda Caafimaadka Minnesota:

www.health.state.mn.us

[muusik qafiiif ah]

Minnesota Department of Health
Communications Office
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-4989
health.communications@state.mn.us
www.health.state.mn.us

9/8/21 (Somali)

Si aad u hesho macluumaadkan oo qaab ka duwan ah, wac: 651-201-4989.